



West Seattle Link Extension

Khulaasada Kooban ee Qaybaha ugu waawayn ee Uruurinta Fikradaha Qorsheynta Boosteejada iyo Helitaanka

Xiligii dayrta 2023, shaqaalaha Sound Transit ayaa fikrado ka uruuriya bulshada si loo balaariyo fikradaha la xiriira nashqada boosteejooyinka afarta ah ee la qorsheeyay kuwaasoo qayb ka ah Mashruuca Balaarinta West Seattle Link (WSLE) si loo xaajiiyo in aan hormar ka samayno shaqada nashqada boosteejada, oo waafaqsan muhiimadaha hadda ee bulshada iyo qaybaha safarka. Sound Transit ayaa ka uruurisay bulshada fikradaha ay ka qabaan helitanka boosteejada, naqshada magaallada, iyo hormarinta diirada saaraysa isku socodka (TOD). Ayadoo qayb ka ah hawshaan fikir uruurinta, Magaallada Seattle ayaa sidoo kale soo bandhigtay mashruucyo la xiriira boosteejo kasta oo laga dhisi doono aaga boosteejada si ay bulshadu fikir uga dhiibato.

Dedaallada fikir uruurinta ayaa iskugu jiray fursadaha tooska loola kulmaayay bulshada oo wata xog uruurinta oonlaynka ah waxayna codsatay in fikir laga dhiibto naqshada boosteejada, hormarinta gelitaanka iyo dookhyada TOD. Qaababka tooska ah ee ku jira kooxaha diirada ee luuqada gudaha, kulannada furan, xog bixin kooban, iyo munaasabadaha kulannada bulshada. Adeegyada turjumaada iyo fasiraada ayaa la bixiyay si loo xaajiiyo in dadka aan ku hadlin Ingiriiska ay ka qaybgeli karaan fursadaha fikrad uruurinta bulshada.

Ogeysiisyada



Sound Transit ayaa bulshada xog ka siisay ka qaybgalka fikir uruurinta ku aadan qorshaha boosteejada oo lagu baxsho ilaha kaladuwan ayna ku jiraan labadaba xiriirada oonlaynka ah iyo kuwa si foolka-foolka ah la iskugu yimaado. Tan waxaa ku jira casuumaado ku aadan munaasabadaha iyo sidoo kale la wadaagista xog uruurinta oonlaynka ah.

Sound Transit ayaa abuurtay boorarka iyo waraaqaha xogta oo xayiiinaaya Kulanka Qorsheynta Boosteejada West Seattle iyo xog uruurinta ku baxaysa Isbaanish, Fiyeednaamiis, Soomaali, iyo Kuuriyaan. Kooxda mashruuca ayaa bilaabay xayiiinnada Isbaanishka iyo Fiyeednaamiis ku baxaaya si loo

xayiiisiiyo kulanka furan ee oonlaynka ah ee mashruuca iyo Shirka Qorsheynta Boosteejada. Xayiiisinnada Facebook ee Isbaanishka iyo Fiyeednaamiiska ayaa xayiiisiiyay labada Kulanka ee Qorsheynta Boosteejada iyo lifaaqyada xog uruurinta turjuman. Sound Transit ayaa iimeel ugu dirtay xogta, lifaaqyada xog uruurinta, iyo

Fikir uruurin ku saleysan tirooyin



Labo kamid ah kulannada tooska ah oo ay ka qaybgaleen wadarta guud 198 qof.



1,232 oo qof ayaa buuxiyay xog uruurinta oonlaynka ah.



Xogaha lagu soo diro iimeelka, waxaa iska diiwaan gashay 12,000 oo daneeyaasha mashruuca ah.



Labo kulannada kooxaha diirada ah oo toos looga qaybgalay ayna kasoo qaybgaleen wadarta guud 20 qof.



Todobo kulannada xog siinta bulshada ah.



Afar munaasabadaha kulanka ah oo ay ka qaybgaleen 130 qof.



Wacyi gelinta guryaha lagu tagaayay si loo qaybiyo boorarka oo lagu dhajiyay ku dhawaad 100 boorarka ganacsiga iyo bulshada ah.



200,000+ qof oo fikrado ka dhiibtay baraha bulshada ayadoo lasoo gashay ku dhawaad 2,000.



Xogta lagu turjumay luuqado badan si loo taageero fikir dhiibasho loo siman yahay.

khulaasada xogta ururada bulshada ayadoo diirada saartay kuwa u adeega deegaannada ku hadla luuqado aan ahayn Ingiriis iyo kuwa u adeegga bulshooyinka ku dhaqan South Delridge iyo White Center.

Ayadoo kaashanaysa barnaamijka Xiriiriyaha Bulshada ee Magaallada Seattle, xiriiriyasha Bulshada ayaa gacan ka gaystay wadaagista xog ku saabsan munaasabadaha iyo xog uruurinta ayagoo adeegsanaaya xogaha turjuman ee shabakadahooda bushada, samaynaaya wargelinta albaab kasta lagu tagaayo ee Koonfurta Delridge Way SW, aaga High Point iyo White Center.

Kulannada furan

Sound Transit ayaa qabatay labo kulannada dadwaynaha ah si ay ula wadaagto xog ku saabsan boosteejooyinka WSLE ayna uga uruuriso fikrado.

Taariikhda Munaasabada	Munaasabada	Ka qaybgaleyaasha
Oktoobar 25, 2023	Shirka Qorshaynta Boosteejada Galbeedka Seattle	180
Nufeembar 29, 2023	Imaatinka Qorsheynta Boosteejada SODO	18

Labada munaasabadoodba waxaa ku jiray bandhiga boorarka muujinaaya naqshadaha boosteejada, qariiradaha muujinaaya mashruucyada macquulka ah si kor loogu qaado isticmaalka boosteejooyinka, iyo xog guud oo ku saabsan WSLE. Sound Transit, Magaallada Seattle, iyo shaqaalaha Ismaamulka King ayaa diyaar u ahaa ka jawabaida su'aalaha. Ka qaybgaleyaasha ayaa fikir nagala wadaagi karay boorarka bandhiga, ayagoo faahfaahin ka bixinaayay jaantusyada bogaga badan ama ku buuxinaayay xog uruurinta isla munaasabada. Xiriiriyasha Bulshada ee Magaallada Seattle ayaa sidoo kale ka qaybgalay munaasabadaha. Munaasabada Qorsheynta Aaga Dhigista dadka ee Boosteejada SODO ayaa lala qabtay SODO BIA.



Kooxaha Diirada La Saaray



Sound Transit ayaa kala shaqaysay Xiriiriyasha Bulshada si ay u qabato kooxaha diirada ee luuqadaha gudaha bishii Diseembar 2023. Kulanadaan kooxda mashruuca ayaa la wadaagtay xogta ku saabsan boosteejooyinka WSLE waxayna uruurisay fikir kooda. Kooxda koobaad ee diirada ayaa lagu qabtay af Fiyeednaamis halka kooxda labaad ee diirada lagu qabtay af-Soomaali iyo luuqadaha kale ee Bariga Afrika. Ka qaybgale kasta oo kooxda diirada kamid ah ayaa la siiyay lacagta magdhawga wakhtigiisa. Kooxda diirada ee Isbaanishka ayaa la qorsheeyay laakiin lama qaban sabab la xiriirta culeysyo dhanka jadwalka ah.

Xog Bixinnada kooban

Sound Transit ayaa la kulantay todobo kamid ah kooxaha bulshada iyo ururada si ay ula wadaagto xogta boosteejooyinka WSLE ayna uga uruuriso fikir. Xogaha kooban ee bulshada ayaa sidoo kale bixiyay fursad lagu xayiisiiyo xog uruurinta fikradaha ku aadan qorsheynta boosteejada haddii dadku doonayaan inay fikir dheeri ah nala wadaagaan. Xogaha kooban ee bulshada ayaa lagu qabtay labadaba si toos ah iyo qaab oonlayn ah.

Taariikhda Bixinta Xogta Kooban	Ururka
Nufeembar 15, 2023	Naadiga Dhulka ee Dugsiga Sare ee West Seattle
Nufeembar 20, 2023	Ururka Hormarinta Xaafada Delridge

Nufeembar 30, 2023	Isbahaysiga Gaadiidka ee West Seattle
Diseembar 5, 2023	Kuleejka South Seattle
Janaayo 2, 2024	Xiriirada Baaskiilka ee West Seattle (West Seattle Bike Connections)
Janaayo 3, 2024	Shabakada Bulshada ee Degmada 1
Fikirka lagu soo diray iimeelka	Ururka Hormarinta Bulshada ee White Center (White Center Community Development Association)
Febraayo 1, 2024	HPAC: Highland Park (South Delridge, Riverview) Action Coalition

Munaasabadaha kulanka



Sound Transit ayaa ka qaybgashay afar kamid ah munaasabadaha kulanka si loola wadaago xogta ku saabsan boosteejooyinka Balaarinta West Seattle Link iyo fikir ku saabsan qorsheynta boosteejada. Munaasabadaha waxaa ka shaqeynaayay labadaba Xiriiriyaasha Bulshada iyo shaqaalaha mashruuca kuwaasoo baxshay xogta ayna ku jiraan munaasabado muujinaaya mashruucyada muhiimka ah si kor loogu qaado helitaanka boosteejooyinka iyo xogta guud ee ku saabsan Mashruuca Balaarinta West Seattle Link. Ka qaybgaleyasha ayaa awooday inay fikir ka baxshaan waxa ay doonayaan inay ku arkaan boosteejada ayna ku jiraan fikradaha hormarinta mustaqbalka.

Taariikhda	Munaasabada	Ka qaybgaleyasha
Nufeembar 4, 2023	Dia de los Muertos	70
Nufeembar 19, 2023	Kulanka Maktabada Delridge	5
Diseembar 9, 2023	Kulanka Hope Central Clinic (rugta Caafimaadka ee Bartamaha Hope) oo ku yaala Rainier Beach Community Center	40
Diseembar 12, 2023	Kulanka Kaydka Cuntada ee Seattle (West Seattle Food Bank)	25

Xog Uruurinta

Sound Transit oo kaashanaysa Magaallada Seattle ayaa samaysay xog uruurin intii u dhexaysay Oktoobar 25 iyo Diseembar 20, 2023. Jawaab bixiyaaha ayaa doortay boosteejada ay inta badan isticmaalaan iyo boosteejooyinka ay doonayaan inay fikirka ka dhiibtaan. Jawaab bixiyaasha ayaa ka jawaabtay su'aalo ku saabsan sida ay doonayaan inay ku galaan boosteejada, mashruucyada mustaqbalka si loo hormariyo gelitaanka, dookhyada hormarinta diirada saaraysa isku socodka (TOD), iyo qaybaha naqshada boosteejada ee ayaga ugu muhiimsan.

Tirada isdhexgallada xog uruurinta ee lagu saleeyay aaga boosteejada:

Boosteejada	Jawaab bixiyaasha Boosteejada aasaasiga ah	Wadar guud ee Xog Uruurinta Qayb ahaan la Buuxshay*	Wadar guud ee Xog Uruurinta Gebi ahaan la Buuxshay
Isgoyska Alaska	47.6% (965 jawaabe)	632	847
Avalon	12.8% (259 jawaabe)	431	566
Delridge	24% (487 jawaabe)	503	571
SODO	8.2% (166 jawaabe)	365	407
7.4% jawaab bixiye ayaa doortay jawaabta "midna kuwa kore"			

*Jawaabaha xog uruurinta qayb ahaan la dhameystiray ayaa lagu muujiyay natiijooyinka ilaa jawaab bixiyuhu ka baxo xog uruurinta.

Xogta aan helnay

Nashqada istaanka

Boosteejada aad ka helayso dareen badqab leh oo awood badan oo ay fududahay in la dhex maro tagaysana aagaga loo arko muhiimada ee dhammaan boosteejooyinka aaga ee dhammaan qaababka fikradaha. Dad badan ayaa sidoo kale sheegay fikradaha kale iyo doonista musqulo laga dhiso aaga boosteejada.

Helitaanka boosteejada

Boosteejooyinka Isgoyska Alaska iyo Avalon, jawaab bixiyaasha ayaa sheegay in lugayntu ay noqon doonto qaabka ugu badan ee gelitaanka, ku imaatinka gaariyaal kale ayaa ah dookha labaad, halka baaskiil ama iskuutar shaqsi ah uu ahaa dookha sadexaad. Boosteejooyinka Delridge iyo SODO, gaadiidka ayaa noqonaaya qaabka koobaad ee lagu tago, lugaynta ayaa ah qaabka labaad, halka baaskiilka gaarka ah ama iskuutarku yahay dookha sadexaad. Gaari ku tagista boosteejada ayaan ahayn dookh lagu sheegay xog uruurinta, laakiin jawaab bixiyaal badan ayaa sheegay inuu noqon doono qaabkooda tagista boosteeyada ayagoo ku qoran godka fikirka dheeriga ah ee la socday su'aasha.

Dadka doorbidaaya inay baaskiil ama iskuutar ku tagaan boosteejada, intooda badan waxay doorteen inay baaskiilka la fuulaan tareenka. Xarun amaan ah, oo leh meel lagu xiro ayaa ah dookha ugu badan, oo noqday dookha inta badan u sahlaaya qofka inuu baaskiilka ama iskuutarka uga tago boosteejada. Dadka ayaa sidoo kale sheegay in ilaallada amaanka ay ka caawin lahaayeen inay ku kalsoondaan inay baaskiilkooda ama iskuutarka ka tagaan.

Dadka isticmaala baaskiilka ama iskuutarka wadaaga ah, qanaacada helida mid u dhow boosteejada ayaa ahayd waxa ugu muhiimsan marka ay go'aansanayaan inay adeegsadaan. Shabakada gaadiidka ee taageeraysa isticmaalka amaanka ah ayaa sidoo kale ahayd muhiim.

Si guud, inkastoo aan maqalnay dad badan oo ka walaacsan baakinka, waxaan sidoo kale maqalnay dad badan oo sheegaaya in boosteejooyinku amaan u yihiin dadka lugaynaaya, baaskiilka iyo iskuutar, iyo dadka adeegsada aalada socodka ee gaarka ah. Soo jeedinnada balaarinta geesaha socodka ee wadada, difaacyo u dhexeeya dadka iyo gaariyaasha, seedadka baaskiilka, iyo gudub-fareyaasha ayaa badnaa. Dadka ayaa sidoo kale dareemay in kordhinta talaabooyinka amaanka sida nalalka iyo ilaallada ay ka caawinaysa boosteejooyinka ay noqdaan kuwo amaan badan.

Hormarinta diirada saaraysa gaadiidka (TOD)

Guryaha qiimaha jaban ayaa noqday muhiimad looga baahan yahay dhammaan aagaga boosteejada marka laga reebo SODO, taasoo sabab la xiriirta aag samaynta, leh noocyada badan ee dookhyada TOD. Jawaab bixiyaasha SODO ayaa muhiimada saaray aaga qaboojinta ama xawaare kordhinta ee biloowyada, xafiisyada tignooloojiyada oo leh xarumaha wax soo saarka, iyo cabitaannada.

Dadka door bidaaya isticmaalka TOD waxaa ku jira dukaamaysiga iyo tafaariiqda, cuntada iyo cabitaanka, iyo adeegyada baashaalka ee dhammaan aagaga boosteejooyinka. Dad badan ayaa sidoo kale sheegay inay xiiseynayaan aagaga kulannada bulshada oo laga sameeyo boosteejooyinka, iyo sidoo kale noocyada kaladuwan ee fursadaha dukaamaysiga, oo yoolku yahay abuurista boosteejooyinka adag, amaanka ah, ee mashquulka badan.

Mashaariicda mustaqbalka

Dadka ayaa dareemay in qaar kamid ah mashruucyada mustaqbalka ee ay soo bandhigto Magaallada Seattle ay kor u qaadi karaan tagista iyo ka imaanshaha boosteejada lagu tago lug, kabo taayiro leh, baaskiil, ama gaariyaal.

Boosteejada Isgoyska Alaska

Mashruucyada soo socda ee mustaqbalka ayaa helay cadadka ugu badan ee iskumidka ah ee taageerada.

- Mashruuca mustaqbalka ee 1 oo laga samaynaayo SW Alaska St inta u dhexaysa 44th Ave SW iyo SW Fauntleroy si ay u baxshaan adeegyada sida geesaha lugta ee wadada oo balaaran, seedadka baaskiilka, nalalka geesaha wadada, iyo geedo lagu beero inta u dhexaysa geesaha lagu socdo ee wadada iyo wadada gaariyaasha si loo taageero gelitanaka gaadiidka joojtada ah.
- Mushruuca mustaqbalka 2 oo laga dhisaayo SW Alaska Street kaasoo tixgelinaaya naqshadaha muhiimada siinaaya basaska iyo astaannada baska, seedadka baaskiilka, iyo geesaha la maro ee wadada si loo fududeeyo isku socodka.
- Mashruuca mustaqbalka 4 oo laga samaynaayo 42nd Ave SW inta u dhexaysa SW Oregon St iyo SW Edmunds St si kor loogu qaado wadada cagaaran ee xaafada oo leh aagaga kulannada, geesaha la maro oo balaaran, aagaga beeraha, seedadka baaskiilka oo difaaca leh iyo nalalka geesaha wadada.

Mashruuca mustaqbalka 3 oo laga dhisaayo 42nd Ave SW inta u dhexaysa SW Hanford St iyo SW Oregon St si loo balaarsho wadada cagaaran ee horay uga jirtay xaafada si loo gaarsiiyo Degmada Admiral ayaa ahayn mida ugu taageero yar. Fikirkaan waxaa nala wadaagay jawaab bixiyaasha xog uruurinta iyo xubnaha bulshada ee ka qaybgalay munaasabadaha. Waxaa sidoo kale jira taageero la siiyay dabaq (mashruuca Mustaqbalka #5) iyo geesaha wadada ee balaaran (mashruuca mmustaqbalka # 6).

Boosteejada Avalon

Mashruucyada soo socda ee mustaqbalka ayaa helay cadadka ugu badan ee iskumidka ah ee taageerada.

- Mashruuca mustaqbalka 2 oo laga samaynaayo 36th Ave SW inta u dhexaysa SW Admiral Way iyo SW Juneau St si loo hormariyo wadada cagaara ee xaafada ee marta sadex xagalka isgoyska West Seattle.
- Mashruuca mustaqbalka 3 oo laga samaynaayo Fauntleroy Way SW inta u dhexaysa SW Alaska St iyo West Seattle Bridge si loogu xiro talaabooyinka tartiibinta gaadiidka, seedadka la filaayo ee baaskiilka, qurxinta dhulka, iyo balaarinta geesaha lagu socdo, iyo sidoo kale kor u qaadista gudub fareyaasha Wadada Cagaaran ee Xaafada.

Jawaab bixiyaasha xog uruurinta iyo dadka ka qaybgalay munaasabada ayaa labaduba muujiyay inay taageerayaan mashruuca mustaqbalka 3, laakiin jawaab bixiyaasha xog uruurinta ayaa muujiyay heer sareeya oo diidmo ah oo ku aadan in mashruucaan uu hormarinaayo helitaanka (16.3% ayaa qayb ahaan ama si buuxda u diiday).

Mashruuca mustaqbalka 1 ee laga dhisaayo SW Alaska Way inta u dhexaysa Fauntleroy Way SW ilaa SW 35th St si kor loogu qaado seedadka horey u jiray ee baaskiilka loogana dhigo seedadka baaskiilka oo difaac leh ayaa helay taageerada ugu hoosaysa.

Boosteejada Delridge

Mashruuca mustaqbalka 4 oo laga dhisaayo Gudub fareyaasha 23rd Ave SW Trail iyo Alki Trail si uu u baxsho laymanka gudub fareyaasha amaanka iyo qanaacada leh ee laga samaynaayo hoosta Buundada West Seattle, ayaa helay taageerada ugu badan.

Mashruuca mustaqbalka 8 oo laga dhisaayo 23rd Ave SW/22nd Ave SW inta u dhexaysa SW Oregon Street iyo 21st Ave SW si kor loogu qaado xiriirada xaafada ee leh meelaha lagu lugeeyo ee ujeedooyinka badan iyo astaannada baska oo casri ah ayaa sidoo kale helay taageerada dadka ugu badan.

Mashruuca mustaqbalka 1 ee 26th Ave SW inta u dhexaysa S Genesee Street iyo SW Andover Street si loo casriyeeyo Wadada Cagaaran ee Xaafada oo leh seedadka baaskiilka oo difaac leh, aaladaha tartiibiya gaadiidka, iyo meelaha wadada laga gooyo oo casri ah oo laga sameeyo SW Genesee Street ayaa sidoo kale helay taageero.

Mashruucyada mustaqbalka ee soo socda ayaa ahaa heerka koobaad ee mashruucayada ugu taageerada yar. Khulaasada Fulinta ee Uruurinta Fikradaha Balaarinta Boosteejada West Seattle Link iyo Qorsheynta Helitaanka - 5

- Mashruuca mustaqbalka 5 oo laga dhisaayo SW Andover St inta u dhexaysa Delridge Way SW iyo 21st Ave SW si ay iskugu xirto Wadada Cagaaran ee Xaafada ee 21st Ave SW ayadoo la kordhinaayo aaga lagu socdo ee ujeedooyinka badan ilaa geeska waqooyi ee SW Andover Street.
- Mashruuca mustaqbalka 6 oo laga samaynaayo SW Andover St inta u dhexaysa SW Avalon St iyo Buundada West Seattle si kor loogu qaado wadooyinka xaafada ayadoo la bixinaayo geesaha wadada ee lagu socdo oo cusub/casri ah, boorarka hagista iyo rakooyinka naafada Sharciga Ameerikaanka Naafada ah (ADA, Americans With Disability).
- Mashruuca mustaqbalka 9 ee SW Brandon St inta u dhexaysa 23rd Ave SW iyo 30th Ave SW si kor loogu qaado wadooyinka xaafadaha ee leh meelaha lagu lugeeyo ee ujeedooyinka badan ama geesaha wadada ee lagu socdo loona casriyeeyo nidaamka bulaacada ee SW Brandon St.
- Mashruuca mustaqbalka 10 oo laga dhisaayo SW Graham St si kor loogu qaado jaranjarooyinka horey u jiray ee Delridge Way SW iyo High Point noola casriyeeyo nalalka wadada SW Graham St ee ku teedsan Bataan Park iyo aagaga 26th Ave SW iyo luuqyada la maro.

Taageerada mashruucyada soo socda ee mustaqbalka ayaysan isku raacin dadka ka jawaabay xog uruurinta iyo dadka ka qaybgalay munaasabada. Tusaale, jawaab bixiyaasha xog uruurinta ayaa mashruuca mustaqbalka ee 3 dookha sadexaad halka dadka ka qaybgalay kulanka furan ay ku asteeyeen heerka sideedaad.

- Mashruuca mustaqbalka 2 oo laga dhisaayo isgoyska SW Andover St iyo 26th Ave SW si kor loogu qaado wadadaan muhiimka ah ee dadka lugaynaaya baaskiileeyda ka imaanaysa xaafada ee imaanaysa boosteejada.
- Mashruuca mustaqbalka 3 oo laga dhisaayo Yancy St inta u dhexaysa 28th Ave SW iyo 26th Ave SW si kor loogu qaado marinnada lugta iyo baaskiilka ee mara Longfellow Creek.
- Mashruuca mustaqbalka 7 ee SW Genese St inta u dhexaysa SW Avalon St iyo Delridge Way si kor loogu qaado wadooyinka xaafada ayadoo la balaarinaayo geesaha wadada ee lagu lugeeyo, kor loo qaadaayo astaannada gaariyaasha, loona hormarinaayo dhirta iyo qurxinta wadooyinka.

Boosteejada SODO

Mid kamid ah mashruucyada mustaqbalka si kor loogu qaado loona balaarsho geesaha wadada ee lagu lugeeyo ee S. Lander Street inta u dhexaysa 6th Ave S iyo Airport Way S. ayaa lasoo bandhigay si fikir looga dhiibto S. Lander St inta u dhexaysa 6th Ave S iyo Airport Way S. Fikradaha ayaa muujiyay in mashruucaan uu xalin karo baahida loo qabo marinnada baaskiilka iyo dadka lugaynaaya ee casriga ah, ayna ku jiraan in laga sameeyo geesaha la maro ee wadada oo dheeri ah wadada SODO.

Talaabooyinka xiga



Fikradaha dadwaynaha ayaa xog ka bixin doona naqshada socota ee boosteejooyinka West Seattle iyo SODO. Sound Transit iyo Magaallada Seattle ayaa adeegsan doona fikradaha laga dhiibto hormarinnada lagu sameynaayo gelitaanka boosteejada si ay uga caawiyaan muhiimad siinta mashruucyada mustaqbalka iyo abuurista naqshada. Sound Transit ayaa u adeegsan doonta fikirka laga dhiibto adeegsiyada hormarinta laga samaynaayo aaga boosteejada si ay dib ugu habayso naqshadeena boosteejada, dib ugu eegto natiijooyinka mustaqbalka ee hormarinta, ayna u abuurto fikir uruurinta mustaqbalka ee dadwaynaha iyo fursadaha iskaashiga. Warbixinta cusub ee Hormarka Qorsheynta Boosteejada Balaarinta West Seattle Link ayaa la heli doonaa xili danbe sanadkaan ama biloowga sanadka soo socda.